

# Xuquuqdayda iyo waajibaadkayga

Waxay WIC bixiyaan adeegyada ay ka mid yihiin barashada nafaqada, taageerada naas-nuujinta, tixraacyada iyo cuntada dheeraadka ah ee caafimaadka ku siin kara. Shaqaalaha WIC waxay wax kaa weydiin doonaan caadooyinkaada ku saabsan caafimaadka iyo cuntada si ay WIC u noqoto wax aad ka faa'ideysato.

## Marka aan isqoro WIC, waxaan XAQ u leeyahay:

- ☑ Wada shaqeyn aan la yeesho shaqaalaha WIC ee dhegeysta baahida aan qabo.
- ☑ Barashada nafaqada ee ku saabsan mawduucyada aan xiiseeyo.
- ☑ Tixraacyada ku saabsan adeegyada kale ee caafimaadka.
- ☑ Waxyaalaha gaar ah. Macluumaadkayga waxa ay ahaanayaan kuwo la dhowray.
- ☑ Kaarka elektranoonikada ah ee gargaarka (kaarka eWIC) oo lagu iibsado cuntada nafaqada leh ee dheeraadka ku ah cuntadayda. Cuntooyinka WIC waxay leedahay nafaqo muhiim ah ee caafimaadkayga u wanaagsan.
- ☑ Hadal aan ka keeno wax aan ku gatay eWIC wakhtiga loogu tala galay gargaarka gudihiisa ee marka wax la gato.
- ☑ Adeeg fiican iyo in si caddaalad iyo sinaan ku dhisan laguula dhaqmo xarunta WIC iyo dukaanka.
- ☑ In aan dacwad dhageysi codsado haddii aanan ku raacsanayn go'aanka xaruntayda WIC iyadoo aan la xiriirayo:

Oregon Health Authority

wic OREGON

### Oregon WIC Program

PO Box 14450

Portland, OR 97293-0450

Telefoonka: 971-673-0040

TTY: 800-735-2900

FAX-KA: 971-673-0071

Nidaamka tayo ee u qalmida iyo ka qaybqaadashada Barnaamijka WIC qofkasta wuu u siman yahay, iyadoon loo eegayn jinsiyada, midabka, dalka laga soo jeedo, da'da, naafanimada, lab ama dheddig. Si aad cabasho kala takoorida ku saabsan u gudbisoo la xiriir **Barnaamijka WIC ee Oregon** sida kor ku qoran ama waxaad raacdaa tilmaamaha hoosta ku qoran.

Waxdani waa fursad shaqo bixiye loo wada siman yahay. Sida ku cad xeerka Federaalka ee sharciga xuquuqda dadweynaha iyo xeerarka u yaala xuquuqda dadweynaha ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), USDA, waaxyaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaheeda, iyo hay'adaheeda kala duwan ee ka qayb qaadanaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxay ka mamnuucaysaa kala takoorida la xiriirta jinsiyada, midabka, dalka laga soo jeedo, lab ama dhidig, naafanimada, da'da ama aargoosiga, ama aargoosiga ku saabsan xiriir hore oo lala lahaa dhaqdhaqaaq u dooda xuquuqda dadweynaha oo ka tirsan barnaamij ama hawl ay samaysay ama maal-gelisay USDA. Dadka naafada ah ee u baahan noocyo kale oo isgaarsiin oo loogu tala galay macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille, farta waaweyn, cajalada la duubo, Nooca Luqadda Dadka aan wax Maqli karin ee Maraykanka, iwm.), waa in ay la xiriiraan Hay'ada (Gobolka ama degaanka) halka ay ka dalbadeen gargaarada. Shakhsiyaadka aan dhagaha wax ka maqlin, aanan si fiican wax u maqli karin, ama dhibaato hadal qaba waxay la xiriiri karaan USDA iyadoo isticmaalaya Adeega Gudbinta ee Dawladda Dhexe 'Federal Relay Service' (800) 877-8339. Intaasi waxaa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa suuragal ah in ay jiraan iyadoo ku qoran luqaddo aan ka ahayn Ingiriisiga. Si aad cabasho kala takoorida ah u gudbisoo, buuxi Foomka Barnaamijka Cabashada Kala takoorida ee USDA (USDA Program Discrimination Complaint Form), (AD-3027) ee laga helo bogga internet-ka: [http://www.ascr.usda.gov/complaint\\_filing\\_cust.html](http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html), ama xafiis kasta oo ay leedahay USDA, ama qor warqad lagu hagaajo USDA waxaanad warqada ku bixisaa dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. Si aad u codsato foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Foomka aad buuxisay ama warqada u gudbi USDA adigoo isticmaalaya:

(1) **Boosta:** U.S. Department of Agriculture  
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights  
1400 Independence Avenue, SW  
Washington, D.C. 20250-9410;

(2) **fax-ka:** (202) 690-7442; ama  
(3) **email-ka:** [program.intake@usda.gov](mailto:program.intake@usda.gov)

Gedi 

## Waajibaadkayga

### Haddii aan ahay ka qayb qaate barnaamijka WIC, waxaan:

- ☑ Keeni doonaa caddaynta aqoonsiga, (cinwaanka) aan ku noolahay, iyo dakhliga dhammaan dadka guriga ku nool markasta oo la eegaayo in aan WIC ka qayb qaadan karo. (**Ma aha** in aan ahaado muwaadin Maraykan ah si aan u helo adeegyada WIC.)
- ☑ Caddaynta aqoonsigayga u soo qaadan doonaa dhammaan balamahayga WIC.
- ☑ Shaqaalaha WIC u sheegi doonaa wixii isbeddelo ah ee ku yimaada macluumaadka aan bixiyay.
- ☑ Ilaalin doonaa balamaha aan leeyahay ama waxaan wici doonaa WIC haddii aanan tagi karin. Haddii aanan ilaalin karin balamaha aan leeyahay oo aan sidoo kale helayo gargaarada cuntada, waxaa laga yaabaa in ay dib u dhacaan amaba la joojiyo adeegyada WIC.
- ☑ Dib u socdan doonaa gargaarada WIC marka la gaaro dhamaadka wakhti kasta oo la isku ogolaaday.
- ☑ La socodsiin doonaa xaruntayda WIC haddii aan u guuro meel kale si macluumaadkayga loo wareejiyo.
- ☑ Gadan doonaa kaliya qiyaasta saxda ah ee cuntooyinka iyo caanaha carruurta ‘formula’ ee dukaamadu ay u oggol yihiin Barnaamijka WIC ee Oregon.
- ☑ Kaarkayga eWIC ka dhigi doonaa mid sugan anigoo PIN lambarkayga ka dhigi doona mid sir ah.
- ☑ Wici doonaa xarunta WIC haddii aan su’aalo qabo, haddii aanan arag cuntooyinka WIC ama caanaha carruurta ee ‘formula’ ee aan dukaamada uga baahnahay ama haddii aan qaato in ka badan inta aan u baahnahay.

## Xeerarka u yaala barnaamijka WIC

### Waxaad raacdaa xeerarkani ama waxaa suurta gal ah in lagaa saaro barnaamijka WIC:

- ▶ Waxaad runta ka sheegtaa macluumaadka aad siiso WIC oo idil.
- ▶ Marka aad joogto dukaanka, ha codsan cuntooyinka ama caanaha carruurta ‘formula’ ee aanad ku heli karayn lacagta gargaarka ee kuugu hartay eWIC. Lama oggola in shey lagu beddesho ama jeegaga gadaal laga isticmaalo ‘rain checks’.
- ▶ Marnaba ha isku dayin in aad gado, ka ganacsato ama bixiso cuntooyinkaaga WIC, caaga caanaha naasaha la iskaga soo saaro oo ay bixisay WIC, caanaha carruurta ‘formula’ ama kaarka eWIC, adigoo ku dagaya internet-ka ama siyaabo kale.
- ▶ Ha soo celin cuntooyinka WIC ama caanaha carruurta ‘formula’ si aad u weydaarsato lacag, credit ama waxyaalo kale.
- ▶ Ma aad isku qori kartid in ka badan hal barnaamij oo WIC ah markiiba.
- ▶ Marnaba ha dhibaateyn, daandaansan, u hanjabin ama dhaawac jidhka loo geysan WIC, shaqaalaha tukaanka ama shaqaalaha suuqa beeralayda.

Haddii aad u baahan tahay macluumaadkan oo qaab kale oo badal ah, fadlan wac 971-673-0040.